

Bayaanka ESD PEAR

Ogos 30, 2022

Mustaqbalka gobolka Washington waa taageerida sinaanta iyo la dagaalanka takoorka. Waa mustaqbalka, "Qofkasta oo ku nool Washington uu si buuxda u helaayo fursadaha, awooda iyo khayraadka uu u baahan yahay si uu u horumaro una gaadho awoodiisa oo dhan." Kani waa amarka dawlada sameysay. Jay Inslee Amarka Digreetada 22-04, iyo qorshaha hiigsiga taageerida sinaanta iyo la dagaalanka takoorka gobolka (PEAR). Laakiin waxa lagu muujiyey dadaalka dhabta ah ee shaqadan — maaha kaliya kalmado laakiin kalmadaheena iyo ficilladeena.

Waxaan aad ugu dadaalayaa hiigsigan mustaqbalka, si la mida sida kooxda hogaankeena sare iyo dhammaan Waaxda Shaqaaleysiinta (ESD).

Barnaamijyadeena wakaaladu waa udub dhexaadka helitaanka dhaqaalaha reer Washington. Waxaanu bixinaa adeegyada isku xidha shaqo raadiyayaasha iyo shaqaaleysiyaha; ka caawinaa in dadku dhisaan xirfadaha horumarinaya fursadhooda dhaqaale; siinaa fasax mushahar leh iyo daryeelka mudada-dheer marka shakhsiyadka iyo qoysasku ugu baahi badan yihiin; oo ka caawinaa in dadku iska bixiyaan biilashooda marka aanay shaqeynayn.

Waxaanu ognahay in caawimadan si siman loo helin.

Kala furfurida nidaamyada labadaba si kas ah iyo si kama ahba loogu talloagalay in dib loogu xoojiyo dheefta, fursada iyo awooda dadka qaar laakiin ma wada qaadan doonto wakhti. ESD waxa ka go'an shaqadani mustaqbalka fog. Waxaanu sidoo kale ku dadaalaynaa helitaanka fursadkasta oo aan ku sameynayno isbadello si dhakhso ah ay uga faa'idaystaan dadka imika ay waxyeelleeyeen sinaan la'aanta barnaamijyadeena iyo nidaamyadeena.

Marka laga yimaad dadaalkeena qorshaha PEAR, ESD waxa sidoo kale ka go'an:

- **Kudarida aragtida bulshada shaqada aan qabano.** Tani macneheedu waa dhisida siyaasad kaqeybgal bulsho oo wanaagsan si loo hubiyo inaan meesha ka saarayno caqabadaha adeegyadeena oo aan abuurayno nidaamyada anfaca dadka aan u adeegno.
- **La macaamilka iskaashatadeena gobolka iyo deegaanka si aan ugu ololeyno sinaanta iyo la dagaalanka takoorka shaqada.** La yeelashada xidhiidho qoto-dheer, xoogan oo kalsooni leh iskaashatadu waxay kordhinaysaa dadaalka bulshada ee shaqada PEAR.

- **Ubadellida hiigsiga wakaaladeena hiigsiga PEAR** – si qiyamkeena, go'aamadeena, siyaasadeheena iyo dhaqankeenu dhammaan u gudbiyo natiijooyin la taaban karo: Marka dadku nasoo wacaan, waxay maqli doonaan hiigsigeena. Marka booqdaan wabsaaydkeena si ay u codsadaan kabka, waxay ku arki doonaan bogga iyo codsiga.
- **Diyaarinta iyo si joogto ah u sixida qorshaha siyaasada wakaaladeena si uu uga turjumo ahmiyadaha PEAR** iyo qorshaha wakaalada ee PEAR.
- **Isdhexgalinta ahmiyadaha iyo shuruucda PEAR markaan diyaarinayn qorshayaasha heer go'aan iyo miisaaniyada wakaalada.** Tani waxay caawin doontaa in la hubiyo in taageerida sinaanta iyo la dagaalanka takoorka shaqo lagu matalo dhammaan heerarka go'aan dejinta ee wakaaladeena.
- **Maalgashiga shaqaaleheena kasoo jeeda bulshooyinka la yaso.** Tani macneheedu waa: horumar badan oo xirfadaha iyo tababaro; la xisaabtanka hogaamiyayaasha si ay u dhageystaan una dhisaan shaqaalahan; xalinta caqabadaha; iyo xoojinta shaqaaleysiinta iyo haysashada shaqaalaha si loo hubiyo in shaqaaleheenu ka turjumayaan bulshooyinka aan u adeegno.

Waxaan aad ugu faraxsanahay shaqadani, waxaan ku mahadnaqayaa fursada aan kaga qeyb ahay isbadelkan dawlada gobolka. Waxaanu ognahay in dadka ay waxyeelaysay xaalada imiku. Waxaanu sameyno maanta, iyo maalin kasta, ayaa micno sameynaya. ESD waxa ka go'an – oo ay markasta ku hawlan tahay – shaqada iyo hiigsiga PEAR si aan u qaban karno qeybteena si loo xaqiijiyo in mustaqbalka loo sinaado.

[Signature]

Cami Feek

Guddoomiyaha, Waaxda Shaqaaleysiinta